UJEEDDO: BAYAAN

Maxkamadda Sare ee JFS, oo garowsan maqaamka sharci ee ay ugu jirto Dalka iyo hay'adda garsoorka, maaddaama ay tahay Hay'adda ugu sarraysa Garsoorka Dalka, masuulna ka tahay in ay si dhab ah u xaqiijiso sarraynta sharciga iyo ku dhaqankiisa, sidoo kale midnimada fasiraadda sharciga si waafaqsan qodobka **108 ee Dastuurka KMG 2012**, iyo qodobka **129aad ee Dastuurka JFS ee 2026 oo ay hadda ka taalo dacwad dastuuri ah**, lala aqriyay qodobka **5aad ee Xeer Lr. 3 soo baxay 12 Juun1962**; Xeerka Nidaamka Garsoorka.

Maxkamadda oo awooddeedu ku baahsan tahay Dalka, una xilsaaran qaadista dacwadaha ugu culus ee lidka ku ah hay'adaha dowladda sida dacwadaha dastuuriga ah inta laga dhisayo Maxkamadda Dastuurka, iyo duritaannada go'aamada maamulka iyo doorashooyinka si waafaqsn qodobka **191/3aad, iyo 131/7aad (A&D) ee Dastuurka JFS 2026** oo ay dacwaddu ka taagan tahy.

Maxkamadda markii ay aragtay sababaha soo socda:-

- In qoraalka lagu sheegay xil ka qaadista Guddoomiyaha Maxkamadda sare ee lagu soo qoray bogga facebook ee Madaxtooyada, kaas oo aan loo cuskan wax qodob ah, ujeeddadiisu tahay in lagu carqaladeeyo caddaalad ka gaaridda Dacwadda Dastuuriga ah ee laga furay Maxkamadda Sare lana xariirta arrimo xassaasi ah oo ay ka mid tahay hannaanka loo maray wax ka beddelka Dastuurka, muddo-xileedka Madaxwaynaha Dalka, Xukuumadda iyo Baarlamaanka Federaalka labadiisa aqal.
- In tallaabada ay qaaday Madaxtooyadu ay tahay mid baalmarsan mabaadi'da dastuuriga ah ee Sarraynta sharciga, Kala saaridda awoodaha laamaha Dowladda, iyo Madaxbannaanida Garsoorka sida lagu xeeriyay qodobada **3/4aad iyo 4aad ee Dastuurka KMG ee 2012**, iyo Dastuurka 2026, ee ay dacwaddu ka taagan tahay, iyo qodobada **3/4aad iyo 4aad ee Dastuurka JFS 2026** oo ay dacwaddu ka taagan tahy.
- In qodobka **135/1aad (a,b&c)** ee Dastuurka cusub ee dacwaddu ka taagan tahay, uu waajibiyay si loo magacaabo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare in la helo soojeedinta Golaha Sare ee Garsoorka, ka dibna Baarlamaanka JFS labadiisa aqal ku ansixiyaan aqlabiyadda xubnaha labada gole, intaas

ka dib uu Madaxwaynuhu ku soo saaro xeer Magacaabista Gudoomiyaha M.sare, halka qodobka **138/4**aad ee dastuurka dacwaddu ka taagan tahay uu jideynayo in xil-ka-qaadista Guddoomiyaha Maxkamadda Sare uu habraaceedu yahay in uu soo jeediyo Golaha Sare ee Garsoorku, kadibna uu xilka kaga qaadi karo cod hal dheeri ah Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo isku dhafan. Haddaba, ma jirto qodob dastuuri ah oo awood u siinaya Madaxweynaha in uu xilka ka qaadi karo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare.

- In aysan waxba ka jirin cabashada lagu sheegay qoraalka lagu faafiyay bogga madaxtooyada ee ah in ay gudbiyeen garsooreyaasha dalku, taa beddelkeedana muddadii uu hogaaminayay garsoorka guddoomiye Baashe Yuusuf Axmed ay qabsoomeen guulo waawayn oo ku saabsan tayaynta garsoorka dalka, hufnaanta iyo la dagaalanka musuqa iyo eexda, aysana, sidoo kale gudoomiyuhu ku suntanaa shaqo wanaag, hufnaan ixtiraam, iyo dhowrista sarraynta sharciga.

WAXAY KU DHAWAAQDAY.

1. In ay waxba kama jiraan (baadil) tahay xil ka qaadista lagu sheegay qoraalka la soo dhigay bogga facebook ee Madaxtooyada,
2. **Maxkamaddu** waxay faraysaa madaxwaynaha in uu ku dhaqmo Dastuurka Dalka, ilaaliyana Madaxbannaanida Hay'adda Garoosrka iyo Sarraynta sharciga asagoo maanka ku haya in uu yahay ilaaliyaha iyo horumariyaha Dastuurka.

DHAMMAAD

TR: 5/11/20

Address: Martini Hospital Road, Hamarweyne District Mogadishu - Somalia.
Email: Contact@supremecourt.gov.so , info@supremecourt.gov.so